# Barnaamijyada Caawimaada Siyaadadda ah ee Qaybta D (Part D) ee Kaarka Medicare

Medicare Part D Extra Help Program

## Waa maxay Barnaamijka Caawimaada Siyaadadda ahi?

Hadii aad ku jiro kaarka Medicare uuna dakhligaagu hooseeyo, waxa aad codsan kartaa barnaamijka Caawimaadka Siyaadadda ah ee Qaybta D (Qaybta D) ee Kaarka Medicare. Caawimaada Siyaadadda ahi waa magaca Barnaamijka Medicare ee kaa caawin kara adiga inaad bixiso dhamaan ama lacagta sannad walba aad jeebkaaga ka bixinayso, iyo dhimida lacagta kaaga soo aadi kharashka dawada laguu soo qoro. Waxaa kaloo loogu yeeraa caawimaadan Kaabida Medicare ka ee Dadka Danyarta.

Laga bilaabo 1, 2024, cid walba oo xaq u yeelata Caawimaad Siyaado ahi waxa ay heli **Kaalmadda Buuxda.** Kaalmadahii qaybta ahaa waa dhamaadeen hadda. Kaalmadda buuxdaa waxa ay bixisaa kharashkaaga intiisa badan.



## Waa maxay habraacyada xaq ugu yeeladka dakhligu?

Waxaa dhici karta inaad xaq u yeelato Barnaamijka Caawimaada Siyaadadda ah oo Buuxa hadii dakhliga sannadkii ku soo gala iyo hantidaadu ay ka hooseeyaan heerarkaas:

- **Qof Kaligi ah**: Dakhli ka yar $22,590 iyo hanti ka yar $17,220 ee 2024.

- **Qof ay isqabaan xillo ay wada nool yihiin oo aan lahayn cid uu mas'uul ka yahay:** Dakhli ka yar $30,660 iyo hanti ka yar $34,360 ee 2024.

Hadii aad ka hooseeyo xadka kaliya uun mid ka mid ah arrimaha (dakhliga iyo hantida), ma aad heli kartid caawimaad buuxda, laakiin waxaa dhici karta inaad hesho wuxuun caawimaad ah. Kolkaa waa inaad iska codsataa.

Waxyaabaha aadan loo xisaabin hanti ahaanta waxaa ku jira guriga, gaariga, alaabta qoysku haysto, dhulka la isku duugo, lacagta gaarka meel loogu dhigo kharashaadka duugida oo gaaraysa ilaa $1,500 qofkiiba, ama lacagta cayminta nafta.

Habraacyada hantida iyo khayraadku waa ay isbedelaan sannad walba. Lamabarada dakhliga ee warqadan xoga aruursan ah waxaa iska leh sanadka 2024. Lambaro cusubi waxa ay soo bixi doonaan gu'ga 2025 ka. Meesha ugu fiican ee laga heli karo habraacyadii cusubi waa shabakada ah [www.medicare.gov](http://www.medicare.gov) ama ka dalbo [www.ssa.gov/medicare/prescriptionhelp/](http://www.ssa.gov/medicare/prescriptionhelp/).
Ama waxaad wici kartaa khadka 1-800-MEDICARE.

## Maxay bixisaa Caawimaada Siyaadadda ah?

Ogow: ka jaritaanadu waa cadadka ay khasabka tahay inaad adigu jeebkaaga aad ka bixiso ka hor inta uusan Medicare Qaybta D (Part D) bilaabin caawinta bixinta kharashka dawooyinka la soo qoro.

**Kaalmadda Buuxda** waxaa aad heli:

- Caawimaada Siyaadadda ahi waxa ay bixisaa lacagta bil walba la bixiyo (qorshaha lacagta ah ee bil walba la bixiyaa waa khasab inuu ka yaraado lacagta laga "cabir" qaato kolka la bixinayo lacagaha bil walba ah oo noqon doonta $42.16 bishii 2024)



- Aadan lahayn wax lacag ah oo aad jeebkaaga ka bixinayso

- Lacata dawada la soo qoro ee aad jeebkaaga ka bixinaysaa aysan ka badnayn $4.50 dawo walba oo aan asal ahayn ama $11.20 dawooyinka asalka ah.

- Aysan jirin wax aan la bixin

Hadii aad hesho **Kabid Qaybta ah**

- Kaliya waxa aad bixin lacagta bil walba la bixiyo iyadoo dakhliga ku salaysan

- Lacagta aad jeebkaaga ka bixinaysaa kama ay badnaanayso $99.00

- Lacagta kugu soo aadaysaa waa 15% ilaa inta kharashka dawadu uu wadar ahaan gaarayo $7,050, kolkaa lacagta kugu soo aadaysa waxa ay u dhaxayn $3.95 (dawada aan asalka ahayn) ilaa iyo $9.85 (dawada asalka ah) ama 5% ee kharashka dawada, hadba labada kii badan.

## Ciddee ayaa heli karta Caawimaada Siyaadada ah?



Dadka qaarkii durbadiiba waxa ay helaan Caawimaada Siyaadadda ah. Hadii aad ku jirto kaarka Medicare Qaybta D (Part D) hadda aadna ka mid tahay mid ka mid ah kooxaha soo socda, waxay ahayd jaa inaad ka qornaato barnaamijka Caawimaada Siyaadadda ah:

- Labo qaybood xaq u yeeladka. Taa macanheedu waa waxa aad heli Medicare Qaybta A (Part A) iyo/ama Qaybta B (Part B) iyo sidoo kale waxaad heli wuxuun Gargaar Caafimaadka ah (Medical Assistance).

- Qorshaha Barnaamijka Lacag Meel u Dhigida Medicare (QMB, SLMB, QI). Eeg warqadayada xogta aruursan ee *Barnaamijka Kedyka ee Medicare*.

- Qaadashada SSI

Hadii aad ku jiro 1 ka mid ah kooxahaa AADNA helin Caawimaada Siyaadadda ah, la xiriir Maamulka Sooshal Sakuuratiga (Social Security), degdegna u codso.

Waxaad kaloo heli kartaa Caawimaada Siyaadadda ah hadii aad hadda ku jirto kaarka Medicare Qaybta D (Part D) aadna ka soo baxdo xeerarka xaq ugu yeeladka ee dakhliga.

## Siddee u codsadaa Caawimaada Siyaadadda ah?

Waxa aad codsan kartaa Caawimaada Siyaadadda ah markii aad rabto. Ka codso Maamulka Sooshal Sakuuratiga (Social Security) ama xafiiska Gobolka ee (Medicaid) ka.

Waxa aad ku codsan kartaa telefanka ama waxaa laguu soo diri karaa codsi adiga.
Wac: 1-800-772-1213
TTY 1-800-325-0778

Ka codso khadka (online) ka, oo gal: ssa.gov/extrahelp/

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**